



## FARIIN QORAN

**KU SOCOTA:** Bulshada iskuulka

**KA SOCOTA:** Jill Carter, Agaasimaha Sare ee Fulinta, Xafiiska Caafimaadka iyo Fayo-qabka, Guddoomiye ku xigeenka Gudiga Fayo-qabka Degmada

**CC:** Mary Skipper, Kormeeraha guud  
Rochelle Nwosu, Madaxa Shaqaalaha  
Linda Chen, Ku xigeenka Kormeeraha Sare  
PJ McCann, Ku-xigeenka Guddoomiyaha Xeerarka iyo Qorshaynta, Gudiga Caafimaadka Dadweynaha Boston

**TAARIKHDA:** Oktoobar 26, 2022

**Ujeedo:** Warbixinta Sannadlaha ah ee Xeerarka Fayo-qabka Degmada Sanad dugsiyeedka 20-21

Ma jirto wax tallaabo ah oo uu u baahan yahay Guddiga Dugsiga taasoo ka dhalatay dib u eegista qoraalkan ogaysiiska ah. Qoraalkan ogaysiiska ah waxay ujeedadiisu tahay in lagu wargeliyo guddiga dugsiga waxqabadyada iyo talooyinka Golaha Fayo-qabka Degmada, iyo sidoo kale ka warbixinta hirgelinta Siyaasadda Fayo-qabka Degmada BPS (HWD-01). District Wellness Council (DWC) waxaa uu uga baahan yahay gobolku inuu sannad walba qiimeeyo u hogaansanaanta Siyaasadda Fayo-qabka Degmada. Waxaan u kala bedelnaa qiimeynta tayo ahaaneed iyo tiro ahaaneed ee sanadlaha ah. Warbixinta ku lifaaqan waa warbixinta tayo ahaaneed waxayna ka kooban tahay:

- Warbixin ku saabsan hadafyada iyo hawlaga ay qabanayaan Golaha Fayo-qabka Degmada intii lagu jiray Sanad dugsiyeedka 20-21;
- Talooyinka ay soo jeediyay gudiga si loo hormariyo hirgelinta xeerarka fayyo-qabka; iyo
- Tusaalooyinka sheekoyin ee fulinta xeerarka fayyo-qabka ee 15 dugsi oo degmada oo dhan ah, kuna salaysan waraysiyada shaqaalaha dugsiga, oo u taagan shaqo aad u wanaagsan dhammaan dhinacyada siyaasadda fayyo-qabka.

Sida ku xusan sharciga dawladda dhexe iyo kan gobolka, warbixintan sannadlaha ah waa in la horgeeyaa Kormeeraha Guud iyo Guddiga Dugsiga BPS, loona gudbiyo Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee Massachusetts (DESE), oo lagana dhigo mid ay heli karaan dadweynaha.

Inta lagu jiro sannad-dugsiyeedkan, Golaha Fayo-qabka Degmada ayaa ururin doona warbixinta tiro ahaaneed ee Sanad dugsiyeedka 2021-2022. Warbixintaas waxaa loo soo bandhigi doonaa guddiga dugsiga dhamaadka sanad dugsiyeedka.